



# Kusoo dhawoow iskuulka!

Welcome to the school! In this brochure we've put together information which is worthwhile knowing before your child begins at the school in the autumn. You can read more on [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)

أهلا وسهلا بكم في المدرسة! قمنا في هذا الكتيب بتجميع معلومات يجدر بك معرفتها قبيل بدأ طفلك المدرسة خلال فصل الخريف الدراسي. بإمكانك قراءة المزيد على الرابط [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)

Dobro došli u školu! U ovoj brošuri smo sakupili informacije koje je dobro poznavati prije nego što vaše dijete krene na jesen u školu. Možete pročitati više na web stranici [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)

به مکتب خوش آمدید! ما در این جزوه، اطلاعاتی را گردآوری کرده ایم که به پیشوازی اینکه فرزند شما در فصل تعلیمی خزانی مکتب خود را آغاز می کند، دانستن آنها خوب می باشد.  
شما می توانید که معلومات بیشتر را در این وب سایت بخوانید: [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)

Tervetuloa kouluun! Tässä esitteessä on kerätty tietoja jotka on hyvä tietää ennenkuin lapsesi aloittaa koulun syksyllä. Voit lukea lisää [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)

به مدرسه خوش آمدید! در این بروشور ما اطلاعاتی را که دانستن آن برای شما که فرزندتان در پاییز مدرسه را آغاز میکند ضروری است جمع آوری کرده ایم. در این وبسایت می توانید مطالب بیشتری در این زمینه بخوانید: [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)

Ku soo dhawoow dugsiga waxbarashada! Waxaa aan buuggan yar ku soo uruirney macluumaad aan u aragno in ay fiicantahay in la ogaado ka hor inta aysan carruurta bilaabin dugsiga waxbarashada sannad dugsiyeedka xiliga deyrta. Waxaa aad macluumaad dheeri ah ka akhrin kartaa mereega intenetka ee [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)

به ختیرین بۆ خویندنگا! له م نامیلکه به دا کۆمه له زانیاریه کمان کۆکردۆته وه که وا چاکه بیا زانیات بهر له وهی مندا له کهت له پایزدا دهستکات به خویندن له خویندنگا! تۆ دهتوانیت زیاتر بخوینیته وه له [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)


ናብ ቤት ትምህርት እንቋቋ ደህን መጻእኩም! ውላድኩም አብ ዝመጽእ ቀውዒ ትምህርት ቅድሚ ምቛማሩ ክትፈልጡዎ አገዳሲ እዩ ዝበልናዮ ሓበሬታ አብዚ ናይ ሓበሬታ ቁጽሊ ወረቐት ማለት ብሮሹር እዚ አስፈርናዮ አለና። ብዝያዳ ግን አብዚ ዝሰብ መርበብ ሓበሬታ እዚ ማለት አብ [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan) አንብቡ።

Okula hoşgeldiniz! Çocuğunuzun sonbahar döneminde okula başlaması öncesinde bilinmesini yararlı gördüğümüz bilgileri bu broşürde topladık. Daha ayrıntılı bilgileri için: [www.goteborg.se/borjaskolan](http://www.goteborg.se/borjaskolan)

## Kusoo dhawoow iskuulka:

Waxa la gaadhay wakhtigii uu ilmahaagu bilaabi lahaa iskuulka, waa talaabo aad u xiiso badan! Waa iska caadi in qofka waalidka ahi uu su'aalo badan iswaydiiyo: dhab ahaantii siduu u shaqeeya fasalka koowaad ee iskuulku (försköleklass)? Ilmahaygu ma tagi karaa dugsiga xiliga firaaqadda la sii joogo? Maxaan u baahanahay inaan kasi fakiro waalid ahaan?

Buugan yar waxaanu kusoo uruurinay warbixin mihiim ah oo loo bahan yahay inaad ogaato marka ilmahaagu iskuulka ka bilaa-bayo Göteborg Stad. Hadaan nahay maamulka iskuuladda hoose dhexe waxaanu rajaynayna in adiga iyo ilmahaaguba dareemi doontaan soo dhawayn diiran iyo isku diyaarinta bilowga iskuulka.



## **Muxu ka dhigan yahay fasalka koowaad ee iskuulku (Förskoleklass)?**

Hadii si fuduud loo sharaxo fasalka bilowga iskuulka ee (Förskoleklass) loo yaqaano waxa lagu tilmaami karaa isku jir ka kooban nidaamka waxbarashadda iskuulka iyo dugsiga xanaanadda. Waxbarashadda fasalka bilowgu ama koowaad uu ku dhisan yahay oo ilmahaagu sii wadaya wixii uu ku bartay dugsiga xanaanada. Laakin ilmahaaga waxa kale oo uu wajahayaa inuu la kulmo oo uu barto cilmi cusub oo sidaan daradeedna uu diyaar u ahaado sii socodka iskuulkiisa.

Waxbarashadu waxay hore u marinaysaa khiyaaliga maskaxda( fantasi), dareen wadaaga iyo awooda wax wada qabsashadda dadka kale. Waxyaabahaas waxa aanu ku suurto galina ciyaar, dhaqdhaqaaq iyo habab kala duwan oo la taaban karo.

## **Ilmahaagu boos ma uga baahan yahay dugsiga la tago xiliga firaaqada (fritidshem).**

Hadii aad shaqayso ama wax barato ilmahaaga waxa uu joogi karaa dugsiga xiliga firaaqada (fritidshem) ka hor ama kadib marka uu wakhtiga iskuulku dhamaado. Ardaygu waxa uu xaq u yeelan karaa boos xataa marxalado kala duwan awgood oo noqon karta xaalada qoyska oo is badasha ama sababo ku saabsan baahida ilmaha. Tusaale ahaan hadii ilmuhu ubaahan yahay tageero barashada afka iswiidhishaka ama hadii goysku dagan yahay hooy ama guri aad cidhiidhi u ah. Wax barashadda dugsiga xiliga firaaqada (fritidshem) iyo fasalka koowaad ee iskuulka (förskoleklass) aad ayaay iskugu dhaw yihiin guud ahaan laakiin waxbarashada dugsiga xiliga firaaha (fritidshem) waxay dhamaystiraysa iskuulka fasalkiisa hore (förskoleklass). Waxaad ka akhrisan kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashadda dugsiga xiliga firaaqada (Fritidshem) halkan [www.skolverket.se](http://www.skolverket.se)

Dhigashadda iskuulka fasalka hore ee koowaad (förskoleklass), dugsi hoose dhexe iyo dugsi hoose dhexe ee caruurta baahida khaaska qabta (grundskola) waa bilaash laakiin waxaad u baahan tahay inaad bixiso khidmad hadii ilmahaagu u dhigto iskuulka xiliga firaaqada (fritidshem). Inta aad lacag bixinaysa waxay ku xidhan tahay dakhliga soo gala qoyskiina. Hadii aad rabto in aad ilmahaaga boos uga hesho dugsiga xiliga firaaqada (fritidshem) waa inaad soo codsata. Hadii aad rabto boos lagu damaanad qaaday tarminka bilowgiisa waa inaad soo codsata ugu dambayn 31 maay. Waxaad ka codsan kartaa oo aad ka akhrisan kartaa macluumaad dheeri ah [www.goteborg.se/fritidshem](http://www.goteborg.se/fritidshem).

## **Xusuusnow**

In hadii aanad rabin booska ilmahaaga ee dugsiga xiliga firaaqada (fritidshem) waa inaad sii daysaa adiga oo isticmaalaya adeega elektarooniga ah/e-tjänst ama foomka. Warbixin dheeradda ka akhriso [goteborg.se/fritidshem](http://goteborg.se/fritidshem)

## **Marka ilmahaagu iskuulka bilaabayo**

Waxyaabo badan ayaa idinku cusub marka la gaadho wakhtiga iskuulka la bilaabayo adiga walidka ah iyo ilmahaagaba.

## **Kulanka warbixinta ee walidiinta**

Iskuulka ilmahaaga ayaa kugu yeedhi doonaa kulan warbixineed ka hor inta aanu iskuulku bilaabmin. Inta kulanku socdo waxaad heli doontaa warbixin ku saabsan iskuulka fasalka hore ee koowaad (förskoleklass) iyo dugsiga xiliga firaaqada (fritidshemmet) ee iskuulka uu ilmahaagu dhigan doono. Kulanka warbixintu waxa uu qabsoomi doonaa qaybta dambe ee guga.

## **Ilmahaagu wuxu soo booqan karaa iskuulkiisa cusub**

Inta aanu iskuulku bilaabmin ka hor ayuu ilmahaagu soo booqan karaa ugu yaraan hal mar iskuulkiisa cusub. Waxayna dhacda inta lagu jiro qaybta dambe ee guga. Hadii ay suurto gal tahay waxa booqashada raacaya macalinka xanaanada cunugaagu dhigto. Hadii ay suurto gali weydo adiga ayaa sii raacaya bedelkeeda. Inaad soo booqato iskuulka hore ee fasalka koowaad (förskoleklass) iyo dugsiga wakhtiga firaaqada (fritidshem) waxay fududeynayaan u gudubka iskuulka ee ilmahaaga si amaan ah.





## **Wada hadalka soo dhawaynta qofka waalidka ah ee haysta awooda masuuliyada ilmaha**

Waxad kasoo qayb gali doontaa oo lagugu casuumi doonaa kulanka soo dhawaynta walidiinta haysta masuuliyadda ilmaha oo aad kula kulmi doonto macalinka cusub ee ilmahaaga. Inta la wada hadlayo waxaad fursad u heli aad kaga waranto ilmahaaga.

Wada hadalka soo dhawaynta waxa la qaban doonaa inta aanu ilmahaagu iskuulka bilaabin ama bilowga hore ee u ilmahagu iskuulka bilaabo, inta u dhaxaysa bisha bisha juun iyo sebtambar.

Maalmaha ugu horeeya ilmahaaga iskuulka

Inta lagu gudo jiro kulanka warbixinta iyo wadahaadalka soo dhawaynta waxa heli doontaa warbixin sida maalmaha ugu horeeyaa u eekaan doonaan.

Hadii ilmahaagu u baahan yahay waafajin ama baahi waa mihiim in uu iskuulku ogaado wakhti hore oo ku haboon. Ka codso xanaanada ilmahaagu dhigto inay u sheegaan ama la xidhiidh iskuulka.



# Sidee ayaay u shaqeeyaan fasalka hore ee iskuulku (förskoleklass) iyo dugsiga wakhtiga firaaqada ah (fritidshem)?

## U dhiibidda iyo kasoo kaxaynta

Ilmahaagu waxa uu joogayaa iskuulka fasalkiisa koowaad wakhti cayiman. Haddii ilmahaagu u ubaahan yahay daryeel kahor ama kadib malintii sababta oo ah in aad adigu shaqaynaysid ama waxbaranaysid, waxaad geynaysa ama kasoo kaxaysanaysa dugsiga wakhtiga firaaqada (fritidshem). Ilmahaagu waa inuu dareemo amaan maalintii oo dhan, sidaas awgeed ayuu macalinku ula socdaa marka ay la kala wareegayaan fasalka koowaad ee iskuulka iyo dugsiga la dhigto wakhtiga firaaqada.

## Cuntada iskuulka

Dhamaan ardayda iskuulka dhigata waxa la siiya qado bilaasha. Haddii cunugaagu uu dhigto dugsiga firaaqada ka hor ama kadib iskuulka waxa kale oo la siiya quraacda iyo cuwaaf. Haddii ilmahaagu u baahan yahay cunto khaasa waxaad la xidhiidhaysa oo u sheegaysaa shaqaalaha iskuulka. Tusaale ahaan waxay noqon kartaa xasaasiyad, daawo ama sababp diineed awgeed.

## Dhar ku haboon cimilada iyo ciyaarta

Qayb ka mida fasalka koowaad ee iskuulka iyo dugsiga wakhtiga firaaqada waxbarashadiisu waxay ku dhisan tahay in ardayda la siiyo fursad ay ku horumariyaan farxada dhaqdhaqaaqooda iyo inay sameeyaan waxyaabo cusub oo kala duwan.

Sidaas daradeed waxa uu ilmahaagu u baahan yahay dhar ku haboon ciyaaraha kala duwan marka ay noqoto gudaha iyo dibadaba, xiligii ladoono halagaga jiro ama sanadka iyo cimila kasta oo lagu jiro. Waxa kale oo aad ka fikirta in ilmahaagu u ubaahan yahay dhar uu ku badasho haddii uu ilmahaagu u baahdo dhar nadiiifa oo qalalan oo uu gashado malinta guda heeda.



## **Barashada afka hooyo iyo taageeradda lagu bixiyo afka hooyo**

Hadii cunugaag ku hadlo ama yaqaano af kale oo aan iswiidhishka ahayn waa in fasalka koowaad ee hore iyo dugsiga firaaqadu ay ka qayb qaataan in ilmahaagu uu helo fursad uu ku horumariyo iswiidhishka iyo af kiisa hooyo labadaba. Tani waxay u suurto galaysa marka macalinku siyaabo kala duwan ugu fiirsado oo u waydiiyo luuqadda hooyo ee ardayga marka la samaynayo waxyaabaha kala duwan.

Göteborg Stad waxay usoo bandhigta laga bilaabo ardayda dhigata fasalka 1 aad inay bartaan luuqadda afkooda hooyo. Arintani waxay khusaysaa dhamaan afaafka oo dhan marka laga reebo luuqaddaha loo aqoonsan yahay kuwa laga tirada badan yahay. Wixii macluumaad ee intaa ka badan ka akhriso [goteborg.se/modersmalsundervisning](http://goteborg.se/modersmalsundervisning)

## **Teramka iyo fasaxyada fasalka bilowga ee iskuulka (Förskoleklass)**

Sanad dugsiiyeedka waxa loo qaybiyaa laba tarmin – teramka dayrta iyo teramka guga. Dhamaan iskuulada dagmada ee Göteborg ku yaala waxay wadaagan oo iskaga mid yihiin sanad dugsiiyeedka. Taasi waxay ka dhigan tahay in kuligood ay iskuulka isku xili bilaabaan oo isku xili dhameeyaan iyo inay dhamaantood isku mar fasaxa wada galan. Dugsiga la aado wakhtiga firaaqada (fritidshem) waa uu furan yahay wakhtiyada fasaxa si ardaydu u baahan daryeel u dhigato. [www.goteborg.se/lasarstider](http://www.goteborg.se/lasarstider) halkan waxaad ka arki kartaa taariikhda fasaxyada la galayo.





## **Codsiga fasaxyada gaagaaban**

Fasalka koowaad ee iskuulka (förskoleklass) waxa wajiba in ardaydu joogto iskuulka. Taas macnaheedu waxa weeyi in ilmahaagu uu ka qayb qaato dhamaan waxbarashadda. Laakiin ilmahaagu waxa uu qaadan karaa fasax maalin ama dhawr cisho hadii ay jito sabaab, tusaale ahaan maalimaha qoysku u dabal dagayan ama ciidaha diimaha.

Maamulaha iskuulka ayaa qiimaynaya in ilmahaaga fasax laga siin karo iskuulka. Hadii aad rabto inaad u dalabto fasax waa inaad soo buuxisa foomkan oo aad ka heli karto [www.goteborg.se/grundskola](http://www.goteborg.se/grundskola).

## **Hadii ilmahaagu jiran yahay waa inuu guriga joogo**

Marka ilmahaagu jiran yahay waa inaad soo sheegta inuu xanuusanayo. Sidaad usoo sheegayso in ilmahaagu uu jiran yahay waxaa kaaga warami doonaa macalinka iskuulka.

### **Ma ogtahay in...**

Dhamaan caruurta waxa ku waajiba inay iskuulka dhigtaan ama tagaan laga bilaabo teramka deyrta, sanadka ay buuxinayaan lix jir. Taas macnaheedu waxa weeyi in ay khasab ku tahay tagida iskuulka fasalka koowaad (förskoleklass).

## **Lawsku waa mamnuuc**

Waa ka mamnuuc markasta in loosoo qaato ama lagu bixiyo lawska, miro sida lawska ah (mandel) iyo sisinta dhamaan iskuulada magaaladda Göteborg. Maamnuucida waxa loo sameeyay maadaama oo qofka xaasaasiyad ku qaba lawska iyo sisinta uu uga iman karo khatar badan oo nafta halis galin karta. Khatarta ah in lawska lagu qaldo midhaha lawska u eeg (mandel) nooga jar jaran iyo ka kaleba, sidaas awgeed ayaa kuligood loo mamnuucay, lawska iyo ka lawsaka u eeg ee (mandel) ka. Waxa laga mamnuucay dhamaan dhismayaasha iskuulka.



# Iskuulka dhaqanka (kulturskolan) - farxad iyo hal abuur wakhtiga firaaqada



Det är ditt barn fyller sex år kan du anmäla hen till Kulturskolan. Här kan ditt barn lära sig att sjunga, dansa, arbeta med film, bild, keramik, cirkus, spela teater eller ett instrument och mycket mer. På fritiden! Läs mer på [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan)

You can enroll your child in Kulturskolan when they reach the age of six. Your child can come here to learn how to sing, dance, work with film, art, circus, play theatre or an instrument and much more. In their spare time! Read more on [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan)

Lapsesi täyttäessä kuusi vuotta voit ilmoittaa hänet kulttuurikouluun (Kulturskolan). Siellä lapset oppivat esimerkiksi laulua, tanssia, filmityötä, kuvataidetta, sirkusta, näyttelemistä tai soittamista eri instrumenteilla, ja paljon muutakin. Toiminta tapahtuu lasten vapaa-ajalla! Lisätietoa on osoitteessa [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan).

زاو ادناوتیم امش کدوک اجنیا رد .دینک مان تعبت Kulturskolan رد ار وا دیناوت یم ،دش هلاس شش امش دنزر ف یقتو تقو رد .دزومایب ار رگید یمازیچ رایسب و زاس ای رتائت یزاب ،سکرس ،سکع ،ملف اب راک ،ندیصقر ،ندن اوخ . [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan) یمازیچ رتشیب یکنرتنأ هحفص نیرد !عزراف

ینالوکس ورتولک فقاقتلا سدرم یف هل لیجسبت بلطت نأ لکنالم ابف رمعل ن م تاوینس تس لکلفط غلغبی امجن .نم ریتکفلو قادا یلع و ا حرس مالو کفریس مالو مسرل او مالفال یف لمعل ،صقرلا ،مان غلا ملعتی نأ انه لکلفط نالم اب . [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan) یلالتا طبارلا یلع دیزملا ارقا !عزرافل تاقاوا یف .یرخال رومال

Kada vaše dijete napuni šest godina, možete ga prijaviti u školu kulture Kulturskolan. Ovdje vaše dijete može naučiti pjevati, plesati, raditi sa filmom, slikama, cirkusom, glumiti ili svirati instrument i još mnogo toga. U slobodno vrijeme! Pročitajte više na [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan)

کدوک اجنیا رد .دینک مان تعبت Kulturskolan گن هرف سدرم رد ار وا دیناوت یم ،دش هلاس شش امش دنزر ف یقتو یمازیچ یلیخ و زاس نتخاوان ای رتات رد یزاب ،کریس ،سکع ،ملیف اب راک ،ندیصقر ،ندن اوخ زاو ادناوت یم امش .دین اوخ رتشیب هراب نی رد [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan) تیاسبو رد !تعارف تاقاوا رد منأ .دزومایب ار رگید

Markii ilmahaagu 6 sano buuxiyo waxaad ka qori kartaa dugsiga dhaqanka (Kulturskolan). Wuxuu halkaan il-mahaagu ka baran karaa inuu heeso, qoob ka ciyaaro, ka shaqeeyo filin, sawirro, golo ciyaareed (siirkus), riwaayad ciyaaro ama qalab muusigi iyo waxyaabo kale. Wakhtiga firaaqada ah! Kasii akhri [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan)

یروتلک یانگن دینوخ و ب تیسونب یوان تیناوتهد وت اوهی موهت اکهدرپ لاس شش تهکهل ادنم کتتاک ،ملیف رسبل ندرکراک ،ندرکامس ،نتو یناروگ یرئف تیناوتهد تهکهل ادنم مرئیل .(نالوکسر ورتولک) یماک هل .تتیب شیرت یتش رزو و کیزوم یکنرتنأ ینین نه نای یرمگوناش ،کریس ،تاش تکیکنو

ወ-ላድካ ለቤት ጥምረት እዚ ድማ ወ-ላድካ ምድራድ፡ ሰዕስዒት፡ ምስራሕ ፊልም፡ ስእል፡ ሰርከስ፡ ጥያቄ ወይ ምስራሕ ምጽዋትን ካልእ ብተሕን ክመሃር ይኻእል። ኣብ ትርፌ ግዜ ኹም! ተወሳኺ ኣብ [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan) ኣንብቡ።

Çocuğunuz altı yaşına geldiğinde onu Kulturskolan'a kaydedebilirsiniz. Burada çocuğunuz şarkı söylemeyi, dans etmeyi, film çekimi, resim, sirk, tiyatro üzerine çalışmayı, enstrüman çalmayı ve çok daha fazlasını öğrenebilir. Boş vaktinde! [goteborg.se/kulturskolan](http://goteborg.se/kulturskolan) adresinden daha fazla bilgi edinebilirsiniz.



# Muxu yahay maamulka dugsiyadda hoose dhexe?

Maamulka dugsiyadda hoose dhexe waxa uu masuul ka yahay shaqada iskuulada magaalada ku yaala ee dagmadu iska leedahay maamushana laga bilaabo fasalka koowaad ilamaa fasalka sagaalad, iskuulada hoose dhexe ee caruurta baahida khaaska qabta iyo iskuulada wakhtiyada firaqada la tago (fritidshem). Waxaanu kuligeen ka wada shaqaynaynaa si aanu ugu suurto galino sida ugu fiican in dhamaan ardayda dhigata iskuulada magaalada Göteborg ay u helaan fursada nolol fiican.

## Waxaanu usii banaynaynaa dariiqii iskuulka mustaqbalka. Miyaay jiraan waxaad ka fikiraysid?

Nagala soo xidhiidh:

### Telefoonka

031-365 09 60 (xarunta xidhiidhka)

### E-Mail

[grundskola@grundskola.goteborg.se](mailto:grundskola@grundskola.goteborg.se)

## Waxad sidoo kale warbixin ka heli kartaa

